TIPS FOR PARENTS

Understanding the *Safe Schools Act*

Fahmidda Sharciga Nabadgelyada Iskuulka

Ma jiraa sharci qeexayo habka ay ardaydu u dhaqmi lahaayeen marka ay iskuulka joogaan?

Haa. *Sharciga Asluubta* ee u degsan gobolkan qeybtiisa Waxbarashada wuxuu si cad u qeexayaa habsami u dhaqanka u degsan gobolkan wuxuuna qorayaa noocyada ciqaabta ah oo ku saabsan dhaqan xumada. Sharciyadan waxaa lagu magacaabaa *Sharciga Nabadgelyada Iskuulka,* waxayna dhaqan galeen bilowgii sanadka 2008.

Sharciga Nabadgelyada Iskuulka ahmiyaddisa ma waxay saarantahay iskuul ka joojinta iyo eryidda ardayda oo kali ahbaa?

Maya. Inkastoo uu sharcigan qeexayo arrimaha ardayga iskuulka looga joojin karo ama looga eryi karo, haddana ahmiyadda ugu weyn waxay saarantahay ka hortagga iyo sida falka inta uusan dhicin wax looga qaban lahaa:

- Iskuulaadka iyo guddiyadooda oo idil waa in ay yeeshaan Sharciga asluubta oo u gaar ah kaas oo ku midaysan Sharciga Asluubta ee u degsan Gobolka oo haddana si fiican u qeexayo tallaabooyinka ku haboon asluub xumada qaarkood. Sharcigan asluubta ku saabsan waa in uu noqdaa mid dadku ay fiirsan karaan, waana in uu ku dheganaado meel laga arki karo ee iskuulka dhexdiisa ah. Sharciga wuxuu aad u tilmaamayaa in la qaado "tallaabooyin kala horeeyo", oo macnaheedu yahay maamulaha in uu mar kasta ku tallaabsato talaabada ku haboon ficil kasta oo dhaca. Waxaa ka mid noqon kara in waalidka ardayga lala kulmo, howl qoraal ah loo diro ardayga, ama lala taliyo, haddii ay asluub xumadu sii socoto ama ay noqoto mid xad dhaaf ah, tallabo adag in laga qaado ardayga taas oo ay noqon karto in iskuulka laga joojiyo ama laga eryo taas oo ay badanaa dhicin.
- Maamulaha inta uusan ardayga iskuulka ka joojinin waa in uu ka baaraan degaa sababta uu ardayga ficilka u sameeyey. Ma midab takoor ayaa lagu sameeyey? Ma loo xoog sheegtay?. Ardayga ma mid ka qebgala barnaamijka "Special Education student" ayuu ahaa? Arrimahan oo idil waxaa lagu magacaabaa "baaritaanka sababaha" dhibka keenay' waana in la tixgeliyo, sidaas oo kale waa in la tixgeliyo dhibaatada ku imaan karta ardaygaas iskuulka laga joojiyey waxbarashadiisa.
- Macallimiinta arday kama joojin karaan dugsiga: awoodaas waxaa iska leh maamulaha oo keli ah. Go'aanka iskuul ka eryidda waxaa iska leh guddiga hantidhowreyaasha oo keli ah ayagoo la tashaday maamulaha iyo shaqaalaha iskuulka.

Arday iskuulka ma laga joojin karaa haddii uu u xoogsheegto arday kale?

Haa. Xoogsheegashada waxay ka mid tahay falalka dambiyada waa-weyn ah. Xoogsheegashada ciqaab ayey mudantahay, xitaa haddii ay ka dhacdo meel ka baxsan xadka iskuulka, ama internetka gudahiisaba. Iskuul kasta waa in uu leeyahay koox u qaabilsan nabadgelyada si loo ilaaliyo isu xoogsheegasho.

Sharciyadan ma quseeyaan falalka ka dhaca iskuulka dibaddiisa?

Haa. Tusaale ahaan, haddii arday uu u hanjabo arday kale ama macallinba asaga oo gurigiisa joogo isticmaalayana internetka, ficilkan wuxuu noqon karaa mid sal ku leh iskuulka iyo waxbarashada sidaas darted ardaygan waxaa iskuulka laga joojin karaa muddo ilaa 20 maalmood ah.

Maxaa dhacayo haddii arday iskuulka laga joojiyo?

- Maamulaha waa in uu warqad qoraal ah ku ogeysiiyo waalidka ardayga 24 saac gudahooda. Qoraalkan waa in uu ku cadyahay sababta iskuulka looga joojiyey, jiritaanka barnaamijyo loogu tala galay ardayda iskuulka laga joojiyo iyo in uu ardayga xaq u leeyahay in uu rafcaan ka qaato go'aanka iyo habka uu u mari lahaa rafcaankaas.
- Arday waxaa iskuulka laga joojin karaa muddo u dhaxeyso 1 ilaa 20 maalmood. Inta uu ka joogo iskuulka ardayga ma imaan karo iskuulka, kama qeybgali karo barnaamijyada iskuulka ka socdo oo ay ka mid yihiin xitaa kuwa duruusta aan ahayn.
- Ardayga iskuulka laga joojiyey muddo ka badan 5 maalmood waa in loo fidiyaa barnaamij waxbarasho dugsiyeed ah si uu culuuntiisa u sii wato. Ardayga haddii uu rabo wuu diidi karaa.
- Ardayga iskuulka laga joojiyey muddo ka badan 10 maalmood waa in loo fidiyaa barnaamij waxbarasho dugsiyeed ah iyo kuwo kaleba sida adeega latalinta.
- Maamulaha, waalidka iyo ruuxa waliga ardeyga ahba rafcaan wey ka qaadan karaan go'aanka iskuul ka joojinta ama ka eryidda ahba, laakiin go'aanka gud-

people for Education
BECAUSE EDUCATION MATTERS MOST

Copies are available in several languages at *www.peopleforeducation.com.*
For more information, call 416-534-0100 or email: *info@peopleforeducation.com*
© People for Education 2009
The Ontario Trillium Foundation
La Fondation Trillium de l'Ontario
toronto community foundation

Understanding the *Safe Schools Act*

diga iskuulka ay ku gaaraan rafcaanka kaddib waa mid aan la beddeli karin.

- Haddii ardayga dugsiga muddo laga joojiyo ayadoo loo cuskaday qodobka dugsi ka joojinta , maamulaha dugsiga waa in uu eegaa haddii ardaygaas uu ku haboon yahay in dugsiga laga eryo iyo in kale.
- Haddii maamulaha dugsiga uu ku taliyo in ardayga laga eryo dugsiga, guddiga waa in uu fadhi ka qaato arrintaasi si uu go'aan uga gaaro taladaas ku aadan eryidda ardayga. Fadhiga waxaa ka soo qeybgalaayo maamulaha, ardayga, waalidka dhalay ardayga ama cidda waliga u ah, iyo xubno ka tirsan guddiga iskuulka.
- Haddii arday laga eryo iskuulka, guddiga waa in uu ardaygaasi u helaa iskuul kale ama uu ardaygaasi ku daro barnaamijka loogu tala galay ardayda iskuulka laga eryay.
- Arday kasta oo laga eryo iskuulka waa in loo sameeyo Qorshaha Waxqabatka Ardayga (Student Action Plan (SAP). Qorshahan (SAP) waa in uu maamulaha soo dejo asagoo la tashanaayo shaqaalaha iskuulka, ardayga iyo waalidka ardayga dhalay. Qorshahan waxaa ku jiro hadafka ardayga, sida loo cabbiri lahaa horumarkiisa, iyo taakuleynta uu u baahanyahayyga.
- Ardayga muddada iskuulka laga joojiyey Inta uusan ku soo laaban fasalka, waa in loo dejiyaa qorshaha uu ku soo noqon lahaa, si ay u sahlanaato soo noqoshadiisa.
- Iskuul kasta iyo guddi kasta waa in uu u degsan yahay Sharciga ku saabsan Nabadgelyada Dugsiga. Sharciyada guddoonka oo idil waxaad ka heleysaa iskuulkaada, ama shabakadda guddoonka waxbarashada.

Waa kuwee arrimaha keeni kara in ardayga si toos ah iskuulka looga joojiyo?

Arrimaha keeni karo iskuul ka joojin	**Arrimaha keeno iskuul ka joojin oo haddana maamulaha uu iskuulka ka eryi karo ardayga waxaa ka mid ah**
Handadaad ah in dhibaato ruux loo geysan doono	Haysasho hub sharci darro ah
Haysasho khamro ama droogo	Hub la isticmaalo oo ruux lagu dhibaateeyo ama lagu handado
Sakhraanimo	Dagaal oo ruux jirkiisa dhaawac loo geysto dhaawacaas oo u baahdo in takhtar lala kaashado.
Macallinka ama ruux kale oo iskuulka awood ku leh oo la aflagaadeeyo	Ruux la faraxumeeyo
Burburin xoog leh oo loo geysto hantida maguurtada ah oo uu iskuulka leeyahay ama hantida kale oo ku dhextaalo iskuulka caruurta ay dhigato gudahiisa	Qanacsiga suuqa madow ee hubka ama droogada
Xoog-sheegasho	Dhacca
Ficil kasta oo uu maamulaha dugsiga u arko in uu lid ku yahay shuruucda u degsan iskuulka	Khamri ruux da' yar la siiyo
	Ficil kasta oo uu maamulaha dugsiga u arko in uu lid ku yahay shuruucda u degsan iskuulka, ficilkaas oo keeni karo in baaritaan lagu sameeyo ardayga si guddiga lagula taliyo in la eryo iyo in kale

Warbixin dheeraad ah oo ku aadan nabadgelyada dugsiga, ka fiiri shabakadda *www.peopleforeducation.com*

people for Education
BECAUSE EDUCATION MATTERS MOST

People for Education is an independent parents' group working to support public education in Ontario's English, French and Catholic schools.

You can reach us at: P.O. Box 64, Station P, Toronto, Ontario, M5S 2S6
Phone: 416-534-0100 • fax: 416-536-0100 • email: *info@peopleforeducation.com* or *visit: www.peopleforeducation.com*